Maahanmuuttovirasto
Migrationsverket
Finnish Immigration Service

# Kooras ku saabsan bulshada Finland

Bulshada Finland




**Finland waxaa ay adduunka kaga taallaa** bartamaha waqooyiga Yurub. Finland waa qeyb ka mid ah waddamada la isku yiraahdo waqooyiga sida Isweden, Norwey, Denmark iyo Iceland. Finland waxaa ay xuduud la wadaagtaa saddex dal oo kala ah: Isweden oo dhanka galbeed ah, Norwey oo dhinaca waqooyi ah iyo Ruushka oo dhinaca bari ka xiga.

**Tirada daka reer Finland** waa qiyaastii 5,5 milyan, baaxadda dhulkeeduna waxaa uu le'eg yahay 338 500 km. Finland waxaa uu ka mid yahay dalalka ugu dadka yar yurub. Finland waxaa ku yaalla keymo iyo harooyin badan, 75% dhulka Finland waa keymo, 10% inta ka soo hartay ee baaxadda dhulka ahna waa biyo.

**Luqadaha rasmiga ah ee Finland** waa finnsih, iswidhish iyo saame. 4,8 milyan oo dadweynaha reer finland ah ayaa ku hadla luqaddooda hooyo ee finishka, 280 000 oo ka mid ah luqaddooda hooyo ee ay ku hadlaan waa iswidhishka, halka luqadda saame ay ku hadlaaan 2000 oo qof oo finish ah. Kooxaha kale ee waaweyn ee luqadaha qalaad ku hadlaa waxaa ay kala yihiin ruushka (93 000) iyo kuwa ku hadla luqadda istooniyaanka oo dhan (50 000). Qof kasta oo ku nool Finland gudaheeda waxaa uu xaq u leeyahay ku dhaqanka iyo ilaalinta dhaqankiisa iyo luqaddiisa hooyaba.

**Dadweynaha reer Finland** qiyaastii 65 % waxaa ay ka tirsan yihiin kaniisadda evankelis-luteri-ga, 1 % waxaa ayka tirsan yihiin kaniisadda ortodoksiga, sidoo kale 1,7 % waxaa ay raacan yihiin diimaha ama madaahibta kale. 32 % dadweunaha ah ee soo harayna waa din la'aan. Finland waxaa ka jirta xoriyadda diinta, qof walbaana waxaa uu xaq u leeyahay ku dhaqanka diinta uu doono, ama haddii uusan rabin in uu noqodo qof aan wax diin ah aaminsanayn. Xuquuqda uu qofku u leeyahay ku dhaqanka diintiisa, waxaa laga dejiyay oo ilaalinaya sharciyada dastuurka dalka.

# Taariikhda

Finland waxaa lagu noolaa oo la degganaa in kabadan 9000 oo sano. Finland taariikh ahaan waxaa ay ahayd qayb ka mid ah Iswedhen xilligii (-1809) iyo Ruushka intii u dhexeysay (1809-1917). Finland waxaa ay xoriyadda qaadatay 1917-kii. Dalka Finland waxaa ka dhacay dagaal sokeeye sannadkii 1918-kii. Dagaalkas kaddib waxaa Finland ka bilowday waagii ama casrigii dhisidda jamhuuraiyadda xorta ah.  Dhaqaalaha Finland waxaa uu si wanaagan u kobcay sannadkii 1920-kii iyo sannadihii 1930-nnaddii.

Finland waxaa ay gashay dagaallo dhowr ah intii u dhexeysay sannadihii 1939-1945. Dagaalkii jiilaalka (1939–1940), dagaalkii dhexmaray Finland iyo Midowga Soofiyeeti ee loo yiqiin (jatkosodassa oo dhacay intii u dhexeysay 1941–1944), dagaalkii dhexmaray Finland iyo Jarmalka ee loo yiqiin (Lapin sota intii u dhexeysay 1944–1945). Dagallaadaas oo dhan intii ay socdeen Finland xoriyaddeeda waa ay haysatay, oo marnaba ma aanay lumin.

Finland waxaa ka dhacay isbeddel xoog leh oo dhanka qaabdhismeedka bulshada ah sannadkii 1960-kii iyo sidoo kale sannadihii 1970-nnadii. Dadkii waxaa ay ka soo guureen baadiyaha iyo shaqooyinkoodii beeraha, iyagoo u soo wareegay magaalooyinka oo ay ka jireen shaqooyinka warshadaha iyo waaxaha adeegyada, sidoo kale dumarkii ayaa ka soo baxay guryaha oo bilaabay shaqooyin mushaar lagu qaadanaayo. Waxaa sidoo kale si weyn kor ugu kacay heerka nolosha iyo isticmaalka badeecadaha iyo adeegyada.

Finland waxaa ay ku biirtay oo xubin ka noqotay Ururka Midowga Yurub sannadkii 1995-kii, waxaana ay qaadatay isticmaalka lacagta Yuurada. Walina lacagta Yuurada ayaa laga isticmaalaa dalkaan finland.

Finland waxaa ay ku biirtay gaashaanbuurta militeri ee Nato sannadka 2023-da.

# Dowladda

Finland waa jamhuuriyad, waxaana ugu sarreeya madaxweynaha. Madaxweynaha waxaa 6-dii sanaba mar lagu doortaa doorasho heer qaran ah.

Baarlamaanka Finland waxaa la yiraahdaa baarlamaan (eduskunta). Baarlamaanku waxaa uu ka kooban yahay 200 oo xildhibaan. Xildhibaannada waxaa 4-tii sanaba hal mar lagu soo dortaa doorasho heer qaran ah. Baarlamaanku wuxuu dejiyaa dhammaan sharciyada dalkaan Finland, waxaana uu ansixiyaa miisaaniyadda dowladda.

Doorashada waxaa codeyn karaa qof kasta oo u dhashay dalkaan Finland oo da'diisu ka weyn tahay 18 sano, qof kasta oo xaq u leh inuu codeeyana, waxaa uu noqon karaa murashax. Qof kasta xaq ayuu u leeyahay in uu ka codeeyo doorashooyinka, laakiin ma aha narrin waajib ama khasab ah.

## Degmooyinka

Finland waxaa xilligaan ka jira in kabadan 300 oo degmo. Degmooyinka marka loo eego tirada dadka deggan waa kuwo aad u yar. Tirada dadka celcelis ahaan waa 18000. Degmooyinka waxaa ay dadweynahooda u qabanqaabiyaan adeegyo, kuwaasoo inta ugu badan ay yihiin waajibaad saaran degmooyinka oo lagu qeexay sharciyada dalka u degsan. Howlaha sharciyada laga dejiyay waa kuwo la xiriira tusaale ahaan adeegyada hoos ku qoran:

- waxbarashada iyo xannaanada
- howlaha maktabadda, dhaqanka iyo dhallinyarada
- qorshha magaalada
- isticmaalka dhulka
- wax soo saarka tamarta iyo biyaha
- hawlaha qashin uruurinta
- adeegyada degaanka

Aagagga nololwanaagga (hyvinvointialue) ayaa ka mas'uul ah daryeelka caafimaadka iyo adeegyada waxqabadka badbaadada ee dadweynaha.

## Magaalooyinka

Dadweynaha reer Finland 72 boqolkiiba waxaa ay ku nool yihiin magaalooyinka. Caasimadda dalka waa Helsinki, taasoo ay ku nool yihiin qiyaastii 650 000 oo qof. Magaalooyinka kale ee waaweyn waxaa ay kala yihiin: Espoo, Tampere, Vantaa, Oulu iyo Turku.



# Sharciga iyo hawlwadeennada

Sharciyada dalkaan Finland waxaa ku xusan xuquuqda ay dadku leeyihiin iyo waajibaadka saaran. Doorka howlwadeennada dowladda waa dhaqangelinta sharciyada iyo xeerarka la dejiyay, ilaalinta ku dhaqanka sharciyadaas iyo siinta wixii hagis ama tilmaanbixin ah ee arrinkaas la xiriira.

Adeegayaasha bulshada waxaa ah dhammaan dadka xiriir shaqo ka haya xarumaha dowladda, degmooyinka aagagga nololwanaagga (hyvinvointialueet), iyo goobaha kale ee guud ee shaqo bixiyayaashu u istcimaalaan fulinta howlaha maamul ee ay hayaan. Saraakiisha dowladdu waxaa ay ka shaqeeyaan wasaaradaha iyo xarumaha dowladda, waxaana tusaale ahaan kamid ah booliska, ilaalada xuduudaha, shaqaalaha kastanka. Shaqaalaha degmooyinka waxaa ka mid ah tusaale ahaan macallimiinta. Shaqaalaha ka shaqeeya xarumaha aagagga nololwanaagga, tusaale ahaan dhakhaatiirta, kalkaalisooyinka caafimaadka iyo daryeelayaasha arrimaha bushada iyo caafimaadka (lähihoitaja).

Dadweynuhu waxaa ay xaq u leeyihiin in ay racfaan ka qaataan, go'aannada ay howlwadeennada dowladdu ka gaaraan arrimaha iyaga khuseeya, waxaana ay cabasho ka soo gudbin karaan khaladaadka ka soo waajaha howlaha ay qabtaan u adeegayaasha bulshada.

# Daryeelka arrimaha bulshada iyo canshuur qaadista

Finland waxaa ka jira nidaam aad u ballaaran oo ku saabsan nololwanaagga iyo daryeelka arrimaha bulshada, kaasoo maalgelintisu ay ka timaaddo canshuur bixinta. Daka oo dhan waxay canshuur ka bixiyaan dakhliga soo gala iyo waxyaabaha ay soo iibsanayaan, sidaas ayuuna qof walbaa dhankiisa uga qaybqaataa nidaamka adeegga ee bulshada, sidoo kale qof walbaa isaga nafsad ahaantiisu wuxuu helaa qiimaha arrinkaas uu leeyahay. Tusaale ahaan dadka oo dhan waxaa u suurtaggal ah in ay helaan dhakhatar rakhiis ah iyo waxbarashada asaasiga ah ee lacag la'aanta ama bilaashka ah, sidoo kale qof walbaa waxaa uu helayaa ama la siinayaa gunnooyinka howlgabka iyo kuwo kala duwan ee qoysaska la siiyo, sida lacagta taageerada guri ku heynta iyo lacagta carruurta.

# Nidaamka waxbarashada

Waxbarashada iskuulka waxaa Finland ay ka bilaabnaysaa, maalinka ilmuhu uu buuxiyo da'da 7-da sano. Waxaa taa ka horreeya hal sano oo waxbarashada hore ah (esiopetus). Ilmo kasta oo Finland si joogto ah ugu nool, waxaa saaran waajibaadka waxbarashada. Waajibaadka waxbarashada waxaa uu ku egyahay ama dhammaanayaa, marka qofka dhallinyarada ah uu buuxiyo da'da 18-ka sano, ama uu taa ka hor dhammeeyo shahaadada heerka labaad (imtixaanka shahaadada dugsiga sare ama imtixaanka shahaadada xirfadda).

Carruurta magangalyoddoonka qaxootiga ah ama kuwa codsaday badbaadada kummeelgaarka ah waxaa ay xaq u leeyihiin in ay wax bartaan, laakiin waajibaadka waxbarashada ma saarna. Waxbarashadu ardayda waa u lacag la'aan, iskuulkana waxaa dhammaan ardayda laga siiyaa cunto lacag la'aan ah.

Sida caadiga ah dhammaan dhallinyarada waxaa ay sii wataan waxbarashadooda marka ay dhammeeyaan waxbarashada asaasiga ah kaddib, iyagoo gala dugsiga sare ama iskuullada xirfadaha midkood.

# Xorriyadda hadalka iyo ka qaybqaadashada howlaha urrurada

Finland gudaheeda qofna looma diidi karo, lamana xadayn karo in uu sheego ama faafiyo fikraddiisa u gaarka ah. Haddana waxaa jirta in xoriyadda hadalku ay keensanayso mas'uuliyad weyn. Qofna looma oggola:

- in uu hadal dhaawac leh u geysto qofka kale waxyaabaha shaksiyad ahaantiisa u gaarka ah in uu dagaal ama rabshad ku kiciyo koox kale oo dad ah

- in uu xoriyyadda hadalka uga qiil dhigto ama ku bannaysto falal cunsurinimo ah.

Qofka waxaa suurtaggal u ah in dalkaan Finland gudihiisa qaabab kala duwan uga qaybqaato ama saameyn ugu yeesho arrimaha bulshada. Qofka muwaadinka ah waxaa uu xaq u leeyahay in uu codeeyo ama uu isu soo sharraxo doorashooyinka. Finland gudaheeda qof walbaa wuxuu qabanqaabin karaa bannaanbax, ama wuu ka qayb qaadan karaa. Waxaa intaas dheer oo Finland gudaheeda ka howlagala jamciyado iyo urruro xirfadeed, kuwaasoo howlahooda qof walbaa uu ka qaybqaadan karo.

## Cimilada iyo xilliyo- sannadeedka

Finland waxaa ka jira afar xilliyo-sanadeed oo  midba kan kale uu ka duwan yahay.


- Jiilaalka ama qaboobaha waa xillli qabow, meelo badan oo dhulka ka mid ah baraf ayaa yaalla
- Gu'ga barafka ayaa dhalaalaya, heerkulka ayaa kor u kacaya, dabeecadda ama bay'adduna mar kale ayay dib u soo toosaysaa.
- Xagaaga waa kulayl iyo iftiin, laakiin waxaa dhici kara isbeddel cimilo oo aad u badan
- Deyrta maalinka ayaa soo yaraanaysa waana mugdi, cimiladuna waa soo qaboobaysa, bay'adda ama dabeecadduna waxaa ay u diyaargaroobaysaa jiilaalka soo socda.

Finland waa dal aad u dheer, waxaana arrinkaas uu saameyn ku leeyahay tusaale ahaan heerkulka. Koonfurta Finland (Etelä-Suomi) waxaa dhici karta in bisha abriil ay cimiladeedu tahay mid diirran oo gu' ah, halka Waqooyiga Finland (Pohjois-Suomi) uu wali baraf ka jiro. Celceliska heerkulka koonfurta ee sannadka oo dhan waa +7, halka waqooyigana ay tahay +1.

## Xafladaha finishka

Finland waxaa ka jira xaflado badan oo heer qaran ah, kuwaasoo tusaale ahaan la xiro iskuullada iyo goobo badan oo xarumaha shaqada ah.  Sidoo kale saacadaha furnaanshaha ee dukaammada ayaa wax iskabeddelaan. Xafladaha ugu muhiimsan waxaa ay kala yihiin:

- sannadka cusub (1.1.)
- iistarka (gu'ga dhexdiisa)
- maalinka shaqaalaha (vappu) (1.5.)
- ciidda bartamaha xagaaga ee loo yaqaan juhannus (dhammaadka juun)
- maalinta xornimada (6.12.) ja
- kirismaska (24.-26.12).



# Qaab nololeedka finishka

Dadka Finishka ah waxaa loo arkaa in ay yihiin dad aamusan oo dhowrsoon. Jiilka cusub ee dhallinyarada ah ayaa iyagu jabiyay sawirkaas waafaqsan dhaqan nololeedka finishka. Waxyaabaha ay finishku ku wanaagsan yihiin waxaa ka mid ah daacadnimada iyo waqtiga oo la ilaaiyo. Wanaagga waqtiga ballanka oo la ilaaiyo waa mid si fiican uga muuqata dhammaan kulamada iyo waqtiyada ballanka ee rasmiga ah, kuwaasoo ay tahay in lagu yimaado waqtiga loogu talaggalay.

Bulshada iyo noloshuba waa kuwo ku salaysan xorriydao dhowr ah, dadkuna iyaga ayaa si madaxbannaani ah u qorshaysanaaya oo go'aan uga gaari kara habsocodka noloshooda. Finland waxaa ka jira tusaale ahaan xorriyad aad u ballaaran oo hadalka iyo diinta ah, xorriyadda ah dhar xirashada iyo in qofku si iskiis ah uu u doorto lammaanaha uu guursanaayo.

Bulshada Finland waa mid ku salaysan qof ahaan. Dadka waxaa loola dhaqmaa qof ahaan, oo looma eego oo kaliya xubin qoyska ka mid ah. Si kastaba qoysku waa mid dadka muhiim u ah. Qoysaskuna waa kuwo noocyo badan, ma ahan oo kaliya sida qoysaska ka kooban laba waalid iyo carruur. Ilmaha waa la qaddariyaa, waxaana ay leeyihiin xuquuq fara badan. Ilmaha in jirkooda la taabto ama wax la gaarsiiyo lama oggola, waa arrin aan sharcigu oggolayn.

Saawnada waa mid ka mid ah meelaha ay finishku aadka u jecel yihiin, waxaana loo isticmaalaa si aad ah, iyadoo aan loo eegeynin xilliyo-sannadeedka. Waana habdhaqan finishku ay ku nafisaan.

Sidoo kale finishka waxaa muhiim u ah bey'adda ama degaanka, qaar badan oo iyaga ka mid ahna waxaa ay u arkaan in ay tahay aqoonsigeenna ama jinsiyaddeenna qarameed. Waxaa la rumaysan yahay in bey'addu ay kordhiso nololwanaagga iyo caafimaadka dadka. Bey'adda waa lagu lugeeyaa, waana lagu xasilaa. Finland waxaa ka jira nidaamka xuquuqda qof kastaa iska leeyahay. Waxaa arrinkaa loola jeedaa, in qof kastaa oo Finland jooga uu aadi karo dhanka bey'adda (tusaale ahaan wuu ku dhex lugeyn karaa, ama wuxuu ka soo guran karaa miraha) iyadoo aanay ku xirnayn, qofka meeshaas iska leh. Si kastaba marka la isticmaalayo xuquuqda qof kastaa iska leeyahay , wax dhibaato ama qashqashaad ah cidna looma gaysan karo.



# Macluumaad dheeraad ah

Fiidiyoow waxbarasho ah ”Dhismaha nololwanaagga: Suomen ja Virtasten vuosisata (Qarnigii Finland iyo Virtanen)” waxaa uu ka warramayaa taariikhda Finland iyo horumarkii bulshada Finland ee bilowgii sannadihii 1900-kii illaa iyo xilligan haatan ah. Mowduuca uu fiidiyowgu ka hadlaayo waa heerarkii khiyaaliga ah ee qoyska Virtanen. Fiidiyowga waxaa lagu qoray luqad fudud oo finishka ah iyo toddoba luqadood oo kale, kuwaasoo kala ah: carabi, ingiriis, faarisi, kurdi (sorani), somaali, Thaylaandi iyo ruush.

**http://suomenvuosisata.fi/suomi.html**

Guriga Finland -waa mashruuc fiidiyoow ah oo ka hadlaaya bulshada Finland. Mowduucyada waxaa kamid ah:

- Canshuur bixinta iyo mabda’a waxqabad ee bulshada nololwanaagga leh
- Dimoqraadiyadda iyo saamaynteeda bulshada
- Waa sidee qofka finishka ee caadiga ah?

Fiidiyowyaasha ka hadlaaya mowduucyadaas waxaad ka heleysaa Youtube-ka:

**https://www.youtube.com/c/KotonaSuomessa/playlists**

Fiidiyoowyada waxaa lagu daawan karaa luqadaha soo socda: finnsih, iswidish, ingiriis, carabi, dari, kurmandzi, somali, sorani, tthaylaandi, shiinaha, faransiiska, istooniya, tigrinya iyo ruush.

Maahanmuuttovirasto
Migrationsverket
Finnish Immigration Service